Deutsches Rotes Kreuz

SUCHDIENST

Raadinta caalamiga ah ee qaraabada

Macluumaadka Ilaalinta Xogta

Raadinta. Isku xirka. Isku keenista.
Adeega Raadinta ee Ururka Laan qeyrta Cas ee Jarmalka (Adeegga Raadinta DRK) waxay caawisaa dadka qoysaskooda ka go'ay sababo la xariira rabshado hubeysan, masiibooyinka dabiiciga ah, baxsasho, barakac ama haajirid. Waxay dadka ka caawisaa raadinta xubnaha qoyska, si ay dib iskula xariiraan ama dib iskula midoobaan.

Waa maxay xogta muhiimka u ah shaqadeena?
Si loo raadiyo qofka, Adeega Raadinta DRK waxay u baahan tahay macluumaadka qofkaan oo badan intii macquul ah. Macluumaadkaas waxaa kamid ah sida magaca, taariikhda qofku dhashay, macluumaadka meesha uu kasoo jeedo iyo meesha uu u haajiray. Xaalada keentay inuu qofku ka tago qoyskiisa ayaa sidoo kale muhiim u ah baaritaankeena. Intaas waxaa dheer, Adeega Raadinta DRK waxay u baahan tahay inay hesho macluumaadka meesha lagala xariiraayo qofka wax goobaya iyo sidoo kale xariirka kala dhexeeya qofka uu goobaayo. Sawirka qofka la goobaayo ayaa sidoo kale fududeen kara baaritaanka.

Dhammaan xogtaas (oo ay kujiraan sawirada) waa xog shaqsiyadeed oo aan u baahanahay si aan ugu adeegsano baahiyaha baaritaanka iyo qofka la baaraayo.

Waa maxay sababta aan ugu baahanay xogta?
Adeega Raadinta DRK (DRK-SDDSG) waxa uu isticmaalaa xogta shaqsiga si uu: u raadiyo dadka maqan, u qeexo nasiibka dibna u mideeyo qoysaska.

Xogta ma loogudbin doonaa qolyo saddexaad?
Xogta shaqsiga waxaan ka dhignaa mid qorsoon. Marka la raadinaayo qofka, waxaan codsiga raadinta u gudbinaa isla Shabakada Adeega Raadinta (urur kamid ah Adeega Raadinta DRK oo qayb ka ah Ururka Caalamiga ah ee Laan qeyrta Cas ee Caalamiga ah (IKRK) iyo Laan qeyrta Cas iyo Ururada Dhaqdhaqaaqa Cas ee Wadamada kale). Dalalka looga shakiyo inuu joogo qofka la raadinaayo, laanta maxaliga ah ee Adeega Raadinta ayaa isku dayda inay hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan halka uu joogo qofka la raadinaayo. Marka la eego ujeedada guud ee shaqadaan waxaa laga yabaa inay muhiim noqoto in xogta shaqsiga loo gudbiyo qolyo saddexaad, tusaale.

- Hay'adaha dawliga ah (tusaale, Laanta socdaalka, hay'adaha diiwaangelinta, xabsiyada),
- Ururada caalamiga ah (tusaale, UNHCR, UNICEF, Dhakhaatiirta aan Xuduuda lahayn, IOM)
- Ururada maxaliga ah (Ururada aan dawliga ahayn ee maxaliga ah, wakaaladaha banii'aadanimada, xarumaha talo bixinta, ururada iscaawinta dadka soo galootiga ah, ururada diinta)
- Masuuliyiinta kale ee dalka (tusaale, dadka dagan xaafada/magaallada, odeyaasha dhaqanka, ciidamada hubaysan ee aan dawlada ka tirsanayn)

Xogta gaarka ah, ayna ku jiraan sawirada, ayaa sidoo kale la daabici karaa si baadi goobka loogu adeegsado:

- Ayadoo waraaqo daabacan ah (Tusaale, boorar, liisaska ama buugaagta sawirada)
- Shaacinta oonlaynka iyo hadalka (tusaale in sawir ahaan looga baaro oonlaynta barta www.tracetheface.org, warbaahinta idaacadaha, daabacaada liisaska oo la gasho interneedka ama shaacinnada dadwaynaha)
-
- dadka degan magaalada iyo xaafada ama odayaasha qabiilka.

Deutsches Rotes Kreuz

SUCHDIENST

Xogta waxaa kaliya loo gudbin karaa qolyaha saddexaad haddii sidaasi lagama maarmaan u tahay in la fuliyo shaqooyinka adeega raadinta. Adoo raacaya habka caddeynta ee lagama maarmaanka u ah oggolaanshaha, waxaad ka reebo kartaa dalalka qaar, hay'ado kale ama daabicida xogta gaarka ah.

Waqti intee le'eg ayaan sii haynaynaa xogta?
Xogta aad nagu aamintay waxaan sii haynaynaa illaa inta ay lagama maarmaan u tahay in lagu fuliyo arimaha kor aan kusoo xusnay sida ujeedada aan u aruurinay xogta.

Xeerarkee loo adeegsanayaa maareynta xogta?
Qof kasta oo ay quseeyso waxaa uu xaq u leeyahay ilaalinta xogta. Shaqada Adeegga Raadinta DRK waxaa lagu maamulaa sharciyada adeega Raadinta DRK (DRK-SDDSG) ee Xeerka Ilaalinta Xogta (DRK-SDDSG). Waxaa intaas sii dheer, waxaan raacnaa sharciyada Xeerka Ilaalinta Xogta Guud (DS-GVO) iyo Xeerka Ilaalinta Xogta ee Dawlada dhexe Jarmalka (BDSG) marka aan isticmaalayno xogtada shaqsiga. Haddii shaqadeenu lagama maarmaan u noqoto inaan xogtaada isku dhex weydaarsano isla gudaha Shakada caalamiga ah ee Adeega Raadinta, laamaha qaybta ka ah ayaa raacaya xeerarka guud ee ilaalinta xogta si ay u isticmaalaan. Waxaan dooneynaa inaan hubino in xogtaada si hufan loo ilaaliyo, gudaha Dhaqdhaqaaqa Laan-qaybta Cas iyo Bisha Cas.

Waa maxay xaquuqahaaga ku aadan ilaalinta xogtaada shaqsiga ah?
Waxaad xaq u leedahay inaad si bilaash ah u hesho xogtaada shaqsiyadeed ee aan hayno. Waxaa intaas dheer, waxaad xaq u leedahay inaad wax ka badesho xogta aan saxnayn ee aan hayno. Haddii aadan ku qanacsanayn keydinta macluumaadkaaga shaqsiyadeed, waad nasoo ogeysiin kartaa arintaas. Intaas kadib waxaan diyaarin doonaa sidaan ku tirtiri lahayn ama ku xanibi lahayd xogtaada.
Shaacin oggolaanshaha la siiyay Adeega Raadinta DRK waa laga noqon karaa gabi ahaanba ama waxaa laga noqon karaa qayb waqti kasta. Fadlan la soco oggolaanshaha daabacada xogta boorarka, sawir buugeedka ama liisaska guud waxaa kaliya laga noqon karaa daabacaadaha mustaqbalka, laakiin lagama noqon karo nuqulada mar hore la daabacay. Ka noqoshada oo qoraal ah waxaa loosoo gudbin karaa Adeega Raadinta DRK (DRK-SDDSG) ee magaalada München, Chiemgaustraße 109, 81549 München, iimaylka: tracing@drk-suchdienst.de (ama xaruunta ka masuulka ah) ayadoo lagu xusaayo magaceeda.

Yaad la xariiri kartaa (Laanta masuulka ka ah)?
Haddii aad wax su'aal ah ka qabtid isticmaalida xogtaada ama meel marinta xaquuqdaada ku aadan macluumaadka, dib u sixitaanka, tirtiritaanka, joojinta, ka noqoshada, waxaad la xariiri kartaa xarunta Adeega Raadinta DRK ee aad kala xariiray codsiga raadinta.

Istaamka ama magaca, ciwaanka iyo taleefoon lambarka xarunta taageerada

Haddii aadan aqoon cida aad la xariirayso, waa caadi inaad lasoo xariirto xaafiiska guud ee Adeega Raadinta DRK:

Deutsches Rotes Kreuz
Generalsekretariat

DRK-Generalsekretariat

Suchdienst-Leitstelle

Version: 11/2022 / Somali

Deutsches Rotes Kreuz

SUCHDIENST

Team 22/Suchdienst-Leitstelle
Carstennstraße 58
12205 Berlin
Taleefoonka: 030 / 8 54 04 -170
Iimaylka: suchdienst@drk.de

Waxaad la xariiri kartaa sarkaalka difaaca xogta ee Adeegga Baadi Goobka kaasoo aad kala xariiri karto ciwaanka:
datenschutz-suchdienst@drk.de.